

HAYAAN

MONTHLY

MAGAZINE



Hayaan Magazine waa magazine bille ah, kaas oo ka soo baxa hargeysa, waxaa uu ka hadli doonaa:

- 1- Horumarinta Nafta
- 2- Arimaha Bulshada
- 3- Diini
- 4- Dhaqanka

**Qof baad tahay
Guul Abuura**

**Qof baad tahay
Guri Yagleela**

**Qof baad tahay
Gaar ahaanti u
gaajo baxa oo
is keena**

- Weedhsame

HAYAAN MAGAZINE

TUSMADA

DAJINTA HADAFYADA

HORUMARINTA NAFTU WAA MAXAY?

DHAWAAQ GUDEEDKA TABAN

AKHRISKA

KUN HABEEN IYO HABEEN

ALLA KA CABSIGA

SHEEKOYINKA DADKA GUULAYSTAY

SIDA LOO DAJIYO HADAFKA



Dajinta hadafkaagu waa inaad qorshe iyo aragti ka yeelato sida aad doonayso inaad noqoto mustaqbalkaaga. Si aad u dajiso haddaf ama qorshayaal waa inaad marka hore yeelataa riyo ama aad heshaa waxaad aad ugu jeelan tahay.

Riyadani waxay noqon kartaa waxay doonto sida inaad noqoto caalim diinta ku xeeldheer, nin lacag leh, inaad iibsato guri wayn iyo gaadhi amase aad noqoto madaxweynaha wadanka aad ku nooshahay.

Talaabada ugu horeysa ee dajinta hadafkaaga

Waxa ugu horeeya eed u baahan tahay inaad qabato si aad u dajiso hadafkaaga si sax ah waa inaad go'aansato waxaad dhab u doonayso. Waa maxay waxa haddii aad hesho badali lahaa noloshada? Xaqiiqdii maxaad u baahan tahay? Waa maxay waxa haddii aad gaadhi lahayd kuu horseedi lahaa farxad.

Sawirashadu waxay kaa caawin kartaa inaad ogaato waxa aad doonayso. Waxaad fadhiisataa goob nafis ah oo aanad kala kulmayn wax ku qasa dabeeto ka fikir himiladaada mustaqbalka. Kadib marka aad sawirato himiladaada waa in hadafyada aa dajinaysaa noqdaan qaar ujeedkoodu yahay una shaqaynaya inaad ku gaadho himiladaada amase riyaada.

Sharciyada lagu gaadho hadafkaaga

Waxaa jira sharciyo aad ugu muhiim ah inaad dajiso hadafkaaga kuwaasi oo ah:

Hadafkaagu ha noqdo mid aan fududayn balse la gaadhi karo: Hadafkaagu ha noqdo mid la gaadhi karo si aanad ugu malayn inaad khiyaamayso naftaada, sidoo kale yaanu noqon mid aad u adag si aanad ugu guul-daraysan inaad gaadho. Hadafkaagu waa inuu noqdaa mid tartan leh si uu kuu dhiirigaliyo, isla mar ahaantaana aanu noqon mid aan suurto gal ahayn si aanad u niyad jabin.

Hadafkaagu ha noqdo mid waqti ku xaddaysan: Si aad hadaf u dajiso waa inaad u yeeshaa waqti xadaysan. Sababtoo ah adiga laftaada ayuu cimrigaagu xadaysan yahay, lagama yaabo inaad noolaato boqolaal sano, noloshuna aad bay u gaabantahay, haddii aanad u samayn waqti hadafyadaadana waxaa dhici karta inaad noqoto qof aan dhiiranayn oo aan samayn wax isbadal ah.

Hadafyadaadu waa inay noqdaan qaar qiyaas leh: Kawaran haddaad tidhaahdo "Waxaan doonayaa inaan ku fiicnaado computer-ka?" Maxaad ula jeedaa markaad leedahay inaan ku fiicnaado? Waa inaad samaysataa hadafyo cad-cad sida inaad akhrido 40 mawduuc oo la xidhiidha cilmiga computer-ka inaad barato laba luuqadood oo programming-ka ah, hadafyadaada waa inaad u kala qaybisaa saddex qaybood oo kala ah hadafyada waqtiga dhaw, hadafyo waqti dhexe ah iyo hadafyo waqti dheer ah. Haddafyada waqtiga dhawi waa inay noqdaan qaar aad u gaar ah. Tusaale ahaan haddii hadafkaaga waqtiga dheeri uu ahaa inaad noqoto safiir, hadafyadaada waqti dhexe waa inay noqdaan inaad barrato saddex luuqadood, hadafyadaada waqtiga dhawna uu noqdo inaad xariif ku noqoto luuqada ingiriisiga sanadkan gudihiisa. Haddii hadafyadaadu noqdaan qaar aan qiyaas lahayn si fiican u gudan maysid hawshaada waxaana laga yaabaa inaad dareento inaad khasaartay. inaad dajisato hadafyo qiyaas lihi waxay kaa caawin karaan inaad gadho yoolkaaga.

Hadafyada waqtiga dheer: Waxa la ogaaday in dadka dajiya hadafyadooda waqtiga dheer ay guul ka gaadhaan hadafyadooda xagga dadka dajiya hadafyada waqtiga gaabani ay ku dhamaystaan wareer niyad jab iyo murugo.

Dajinta hadafkaaga iyo maamulida waqtigaaga

Badanaa marka laga hadlayo dajinta hadafkaaga arinta kale ee soo raacaysaa waa inaad barato sida loo maamulo waqtigaaga. Inaad barato sida saxda ah ee loo maamulo waqtigaagu waxay kaa caawin doontaa inaad awood u yeelato inaad waqtigaaga u maamusho sida ugu fiican tana waxay kugu hogaamin doontaa inaad sida ugu dhakhsaha badan ku gaadho hadafkaaga.

Waxa Qoray:
Mustafe Mahad Xuseen

HORUMARINTA NAFTA



Horumarinta naftu (self-development) waa shey lagam maarna u ah meertada nolasha. Diintana islaam-kuna aad ayey u dhiiri galineysa in uu qofku horumariyo naftiisa, ta ehelkiisa iyo ta wadan kiisaba.

Waxaney u qeybisa saddeax qeybood oo kala ah:

- ☒ **Horumarint ruuxda.**
- ☒ **Horumarinta maskaxda.**
- ☒ **Horumarinta jidhka**

Saddexdan waxa leysku yidhahda (system).

Saddexda si aad u horumariso waxaad u bahan tahey saddexdan arimood oo ka cawinaya inaad horumariso naftada si aad uga guulaysato lagdanka iyo hidanka ka dhex jira meerto nolalededka, saddexda arimood eel agama marmanka waxa ay kala yihiin

- Niyaadsami iyo yididiilo.
- Cilmig iyo aqoonta.
- Xirfadaha.

Saddexdan kalana waxa leysku yidhahda (tools) madama oo ay yihiin wadadii lagu horumarineyey systemka.

Waxa la tilmama in sameynta hadafyadu yihiin mishiinka dhaqajiyi awoodaha qarsoon ee binaaadamka. Arimaha ugu waaweyn ee laga sameeyo hadafyadu wax ka mid ah:

1. In uu qofku yahey mid leh karti iyo xirfad uu shaqo ku qaban karo.
2. In uu sameyn kaaro xidhiidho aad u adag oo ka dhaxeya ehelkiisa iyo asxaabtiisa IWM.
3. In uu yahay qof jidh ahaan iyo maskax ahaanba u fayow una caafimad qaba.

4. In uu yahey qof u shaqeysta akhiraadisa kuna dadaala wixii cilmi iyo camal ah ee gaadhsinkara rali ahaansha ALLE iyo nolasha barwaaqadu ku dhantahay ee aan dhamadka laheyn ee wax walba oo ay naftu doontaba laga helayo. Alla ha inaga dhigo kuwa ku guulaysta.

Humarinta nafta waxa loo qeybiya saddex qeybood, oo laba ka mid ahi ay yihiin lagama maarman.

Qeybta koowada waa barashada nafta, oo u qeybsanta sided qeybood :

- ☒ Shaqsiyada.
- ☒ Fikirka.
- ☒ Dareemada.
- ☒ Aamin sananta qofka.
- ☒ Caadooyinka.
- ☒ Kalsoonida nafta.
- ☒ Dhiri galinta nafta.
- ☒ Waxyabah uu daneyo qofku.
- ☒ Barashada iyo horumarinta waxaad ku ficantahey iyo waxaad ku xuntahey.

Siddedan qodob ee kor ku xusani waa waxa yabaha qofka u suurto galiya in uu ogaado wuxuu jeceyl yahey iyo wuxuu neceb yahey labadaba. Gadhsinkarana guusha sidoo kalena ka hor istaagi kara in uu guuleysto. Waxeynu odhan karna siddeedan arimood waa waxyabaha kaa cawinaya in aad u gudubto qeybta labaad ee horumainta nafta.

Markeynu qeybtaa si fican u soo barano waxa aynu u gudbeyna qeybta labad oo ah in aynu ku dhacno dariiqi ama wadadii ina geyneysey hadafyadii iyo yididiiloyinkii aynu hore u soo jeexney.

Qofku marka uu ku guuleysto hadafyadii uu noolasha ka lahaa, waxa u helayaa nolol tii uu rabey oo ah nolal ay ku xeeran tahey farxado iyo wax yaabo badan oo aan la soo koobi karin oo u dareemi karo oo kaliya qofka gaadhey himiladii iyo rajadii uu ka laha dunida tan. Laakinse wadada lagu gaadhayo guushu waa mid ay ku hareereysan yihiin dhibatoyin farabadan.

Waxaad maanka ku heysan In horumariinta nafta ay ugu mihiimsantahey qeybta labaad, oo qofka qeybtaa soo dhafa uu ku eekan karo qeybta qasabna anaaney aheen in uu u sii gudbo qeybta saddexda, balse inagoo ka qiyaas qadaneyna { quraanka kariinka Suuratul Al casr } waxeynu isku dayeynaa in aynu dadka kale wax tarno ugana tagno. Si uu magaceenu u noqdo mid sii jira ilaa dhima-shadena ka dib, halku dhigeenuna yahey { waari meyside war hakaa hadho}.

Hadii aynu u gubno qeybta saddexad oo lyana ah mid muhimadeeda leh, waxa aynu qeybineyna laba qeybood oo kala ah:

☒ In uu u banbaxo sidii uu u buuxin lahayn kalinta aynu ku yeelan lahayn bulshada inteeda kale, marka aynuu teena gaaraheened ku soo guulaysanay.

☒ Kama dambeystii waa in uu qofku isku diyaariyo noolasha aakhiro ee aan dhamadka lahayn, kana sahay qaato aduunyadan wax ka anfaci kara maalinta qiyamaha u ee uu qofku ugu baahi badanyay, una horseeda helitaanka raali ahaansha alle.

**Waxa Qoray:
Hayaan Editorial Team**

DHAWAAQ GUDEEDKA TABAN

Ma maqashaa cod kaa dhex hadlaya oo kaa joojinaya dhammaan hawlaha wanaagsan?

Ma ku faraa in aad mararka qaar iskaga fogaato ehelkaaga iyo asxaabtaada?

uu sheegaa in aanad waxba qaban Karin oo aad diciif tahay?

Ma dareentaa in aad ka duwantahay dadka?

Talaabo kasta oo aad isku daydo in aad qaado ma jiraa cod kaa joojinaya oo ku leh “ Ma qaban kartid”?

Ma iska saniftaa dadka qaar oo ma ka saartaa nolohaada iyaga oo aan waxba kugu samayn?

Waa Maxay Dhawaaq gudeedka Tabani?

Dhawaaq gudeedka tabani waa cod gudeed, kaas oo ah mid ku lidi ah oo burubrinaya nafaheena iyo horumarkeena, sidoo kalena inagu diraya asxaabteena ama se dadka inagu xeeran. Codkani waxa uu ku sumaysmaa maskaxda qofka, kaas oo noqda hab fikir taban oo saamayn wayn ku yeelan kara nolohaada iyo hab dhaqankaagaba.

Codkani waxa uu kuula hadlaya hab aad adigu maqlayso uun, waxaana uu la doodayaa naftaada, isaga oo ka joojinaya dhammaan waxa danta u ah oo dhan. Sidoo kale codkani qofka waxa uu ka dhigaa mid u dhaqma si taban oo wax walba ka arka dhanka xun, niyad jab, kalsooni darro iyo hoosayn ayuuna u sababaa codkani qofka uu haleelo.

Maxaa sababa dhawaaq gudeedkan taban?

Dhawaaq gudeedkan tabani maaha mid aynu ku dhalano se waxa sababa dhibaatooyin nololeed oo uu hore ula kulmay qofku markii uu yaraa, sida Khilaafaad qoys oo uu ilmaha yari ku soo dhex barbaaray, hadalo taban oo uu waalidku mar walba u adeegsan jiray ilmaha sida: (Waxaad tahay doqon, waxba ma garanaysid, IWM) dhibaatooyinkan iyo kalmadahan inagaga iman kara xaga qoysku waxay qayb laxaad leh ka qaataan in uu qofka ku dhex samaysmo hab-fikirkan codka ah ee baabiiya mustaqbalka qofka, kaas oo ku soo baxa waqtiga qaan-gaadhnimada.

Hannaan dheer ayuu soo maraa si uu codkani u samaysmo waxaana uu soo qaataa sannaddo badan oo ka mid ah koriinka hore ee qofka. Sidoo kale waxa sababi kara inuu codkani samaysmo asxaabta ku xeeran qofku marka uu yaryahay oo yaraysta awoodiisa kuna jees-jeesa siiba, marka lagu jiro heerka wax barasho ee dugsiga hoose ilaa dhexe.

Mararka qaarkood waxa dhacda in qofkii oo ku soo koray nolol wanaagsan, si fiicana loo soo koriyay marka uu waynaado inuu ku samaysmo codkani, sababo la xidhiidha dhibaatooyin soo wajahay; sida guul darrooyin soo waajahay qofka, dhaqaale darro wayn, xidhiidh guur ama se mid jacayl oo uu qofku ku guul daraystay iyo isku buuq ka dhashay culays shaqo ama se fikir.

Sidee ayuu codkani inoo saamayn karaa?

Codkan gudeed waa cadow gudaheena ku nool, kaas oo saamayn kara dhinac kasta oo nolosheena ah. Sida Kalsoonideena, sida aynu nafteena u aragno, xidhiidhka aynu la samayno dadka inagu xeeran, shaqooyinkeena, waxbarashadeena iyo dhammaan yoolka aynu nolosha ka leenahayba.

Hab-fikirkan ama se codkan tabani waxa uu hoos u dhigaa dareenkeena iyo aragtideena toggan (wanaagsan) ee aynu nafteena iyo nolosheenaba ka qabno, waxaanu inagu hogaamiyaa is canaanasho badan oo aan sixid lahayn, niyad jab, liidnimo, caajis, madax xanuun, baqasho, hoo-sayn, go'aan jilayc iyo joogtayn la'aan iyo aaminaad la'aan. Taas oo sababta inaynu nolosha quus ka istaagno si kasta oo aynu u haysano fursado; waxaana uu nolosha inaga tusaa dhinaca madoow.

Waxyaalaha uu codkani dadka ugu sheekeeyo: Haddii aynu ka soo qaadano tusaaleyaal guud kalmadaha uu codkani adeegsado waxa ka mid ah:

- “ waxba ma tihid, lamana tartami kartid qayrkaa”
 - “ awood uma lihid in aad wax qabato”
 - “ dadka lama mid tihid oo waad ka liidataa”
 - “ culayskan ku saaran iskama caabiyi kartid”
 - “ dhibaatan ku haysata awood uma lihid in aad xalliso”
 - “ waligaa guulaysan maysid”
 - “ waa lagu necebyahay, cidna kuma rabto”
 - “ waxba haysku dayin haddii kale waa lagula yaabi”
 - “ dadku waa wada khiyaamolayaal, cidna ha aaminin ee kaligaa iska nooloo”
 - “ dadkii wanaagsanaa Aduunyada way ka dhammaadeen ee cidna hala saaxiibin”
 - “ cidna ha u naxariisan haddii kale waa lagu dhaawici”
 - “Qof xun ayaad tahay”
- Kuwan iyo kalmado kale oo uu codkani adeegsado ayaa jira, si uu hoos ugu dhigo qofka.
- Sidee layskaga dawayn karaa dhawaaq gudeedkan taban?
- Dhib kasta oo ka jirta Aduunyada Illaahay (S.W.T) waxa uu abuuray xalkeedii, ha ka warwarin waliga in ay jirto dhib bilaa xal ahi.
- Si aad isaga dawayso oo aad uga guulaysato codkan taban waxa aad u baahantahay in aad qaado talaabooyinkan kuwaas oo ah kuwo ku anfici kara:

1: Faham macnaha guud ee nolosha: In aad fahanto macnaha ama se ujeedada ugu wayn ee Aduunyada lagu keenay waxay kaa caawinaysaa in aad noqoto qof aan u nuglaan waayaha Aduun ee ku xeeran, samir, dulqaad iyo ficil wanaagsana ku waajaha, maadaama ay noloshu tahay mid aan lagu waarayn.

Illaaahay ayaa Quraankiisa ku yidhi:

عَمَّ لَوْلَا نِ الْاَصْلُ اَوْ رُبَّصَلِّ اِبْ اَوْنِ عِغْتَسَا اَوْنِ مَآ نِي دَلَا اَهِيْ اَيَّ

“نِ رِبْ اَصْلَا

[153: فرق بل]

“ Kuwii limaanka laga helayoow kaalmaysta sabir iyo salaad Illaahay waxa uu la jiraa kuwa sabree” Surat Al-Baqara

2: Codkani marka uu wax kaa joojinayo maaha mid kuu ca-daynayaa sababta, waxa uu adeegsadaa daliilo diciifa oo aad burin karto haddii aad soo baadho, mar kasta oo uu ku yidhaahdo sidaas same ama se ma samayn kartid, ku celi su'aal ah sababee? Iskuna day in aad ka fikirto dhinacyo kala duwan, adiga oo eegaya maslaxadda noloshaada iyo dhibaataada ama se wanaaga uu kuu horseedi kari ficilkaasi.

3: Ogsoonooow mar walba inuu cadow kugu yahay codkani oo aanu ku farayn wax kuu dan ah, ogoow inuu jiro cod kale oo togan oo kaa difaaci kara isla codkan haddii uu xooga-naado.

4: Ha gaadhin go'aan degdeg ah: codkani waxa uu kugu kalifayaa in aad gaadho go'aan degdeg ah si uu kaaga guulaysto kuuna seejiyo fursado badan, isaga oo kaa indho tiraya xaqiiqooyinka dhabta ah ee kugu xeeran.

5: Ka warqab naftaada: in aad ka warqabto naftaadu waxay kuu saamaxaysaa in aad ogaato waqtiga uu codkani kula hadlayo iyo waqtiyada kale ee aad gaadhi karto go'aanka saxda ah.

6: U shaqee caksiga codkan: Maadaama uu codkani yahay mid ka hor imanaya dantaada shaqsiyeed iyo waxyaalaha kuu wanaagsan waa in aad u shaqaysaa caksiga waxa uu ku faro.

7: Baro hab aad naftaada u dajin kartid marka aad isku buuqsantahay, waayo dhibaataada ugu wayni waxay ka timaadaa go'aano aynu qaadano inaga oo aan maskaxda soo marin, taas oo uu ka faa'idaysto isla codkani.

8: Qor dhammaan hadafyadaada: inaad lahaato buug aad ku qorto hadafyadaada iyo dhammaan qaab nololeedkaagu waxay kuu saamayxaysaa in aad ka adkaato codkan oo aad noqoto qof ka gudba carqaladaha.

9: Samayso saaxiib kuu dhaw oo aad kala tashato arima-haaga: in aad lahaato saaxiib kuu dhaw oo aad is aamintaan waxay kuu sahlaysaa inuu kaa yaraado codkani.

10: Dhagayso codka togan (wanaagsan) ee kula hadlaya kaas oo ah mid naaqus ah marka aad ku jirto xaaladan, shaki ha gelin talaabo kasta oo wanaagsan oo aad qaadayso, iskuna day in aad falanqayso dhinacyo badana ka eegto.

11: Salaadahaaga ka dhig kuwo khushuuc leh si uu qalbigaagu u dago, sidoo kalena Illaahay ka bari inuu qalbigaaga ka masaxo.

12: Maadaama uu yahay codkani mid ay qaadatay muddo in uu samaysmo kaas oo soo maray xaalado kala duwan, waxa aad u baahantahay in aad badasho hab fikirkaaga deetana aad samaysato caadooyin wanaagsan oo ku anf-caya, taasina waxay qaadanaysaa waqti ee waxay kaaga baahantahay samirkeeda iyo joogtaynteeda.

Dhibaatanani maanta waxa ay haysataa, oo ay hankoodii iyo himiladoodiiba ka hor istaagtay; dhallinyaro badan oo horumar gaadhi lahayd, waana dhibaato aan la dareensanayn una suxul duuban yihiin dhallinyaro badani se aanay dareensanayn.

AKHRISKU WAA FURAHA AQOONTA



Akhrisku waxa uu kamid yahay afarta xirfad barasho ee waawayn, waana midka ugu muhiimsan ee aqoontu kasoo maaxato. Qormadan kooban waxaan diirada ku saari doonaa in aan wax ka iftiimiyo sida umaddaha aduunku ugu kala duwanyihiin akhriska, faa'iidada akhrisku u leeyahay shaqsiga iyo bulshada iyo inagu bulsho ahaan heerka aynu ka joogno akhriska.

Ugu horayn hadaan milicsano ummadaha kala gadisan ee caalamkan kuwada nool, innaga oo ka eegayna sooyaalkooda siyaasadeed, dhaqaale, farsamo iyo waliba garaadka aqooneed ee bulsho,

waxaa si fudud kuugu muuqanaya sawiro aad u kala duwan oo ku tusaya bulsho kasta halka ay ka joogto arrimahaas. Waana taas ta keentay in aduunkan oo mida iyo dadka ku nool oo Adam wada dhalay in ay hadana u kala baxaan ummado horumaray, ilbaxnimo leh, waxna gumaysta iyo qaar kaloo dib u dhacay, aqoontoodu hoosayso lana gumaysto.

Hadaba waa makhraati ma doon in qofka fayooow durbaba ay maskaxdiisa kusoo degdegi su'aasha ah maxaa sababay in umadduhu sidaas u kala duwanaadaan.

Jawaabta oo kooban waa heerka aqoontooda oo kala sareeya.

Wadamada horumaray waa ay ka aqoon, xirfad iyo ilbaxnimo badan yihiin kuwa kale, taasna waxaa kuu cadaynaya heerka ay ka gaadheen culuumta kala duwan iyo wax soosaarkooda. Waxaad na ogaataa akhriska iyo saxiibkiisa dhabta ah waa qoraalka ee in ay yihiin furaha aqoontan la isku dhaafay. Iyadoo aynu wada ognahay sida ummadaha horumaray uga akhris iyo aqoon badan yihiin kuwa dib udhacay, waxaan tusaale fudud usooqadanaynaa war bixin uu sanadkii 2014 daabacay wargayska Mental floss taas oo faraysa umad kasta iyo qof walboo hormar raadis ah inuu badiyo akhriska.

Waxaan ka soo qaadnaynaa Saddexda wadan ee caalamka ugu akhriska badan iyo inta saac-dood ee

dadkoodu wax akhriyo todobaadkii celcelis ahaan.

1. India = 10 saac, 42 daqiiqo
2. Thailand = 9 saac, 24 daqiiqo
3. China = 8 saac

Hadaba akhristaw ma shaki baa kaaga jira in saddexdaas wadan ay hormar xawli ah ku socdaan? Mase ogtahay in ay ku jiraan hayaan dheer oo ay ku gaadhayaan umaddaha horumaray? Jawaabta adaan kuu dhaafi!

Hadii aan aragnay sida umaddaha aduunku ugu kala duwan yihiin akhriska in ay wax walbana ugu kala duwanyihiin, bal aan wax yar ka idhaahdo faa'iidada akhriska ee qof ahaaneed iyo ta bulsheed.

Ahmiyada akhrisku uma baahna sharaxaad badan waayo waa sida qorraxda oo kale cid caqli u saaxiibana kama qarsoona waa tay soomaalidu dhihi jirtay "waa baryay sacabo laguma qarinkaro" oo kale. Waxaa kaloo iyana kugu filan Diinteena xaniifka ah meeqaanka uu akhrisku ka-joogo, iyadoo quraan ka kariim ka ah Eebe SWC ku bilaabay "IQRA" Akhri iyo sidii saxaabadii Rasuulka SCW iyo culimadii hore ee islaamka agtooda uu ka ahaa akhrisku.

Tusaale fiicana waxaa inoo ah xiligii dawladii Cabaasiyiinta halka ay reer Baqdaad ka gaadheen akhriska iyo qoraalka iyo sidii dhalinta caalamku ugu xerayn jireen Baqdaad.

Hadaba hadii aan wax yar ka sheego faa'iidooyinka bulsheed ee qoraalka waxaa kamida:-

- Akhrisku wuxuu kobciyaa garaadka bulshada.
- Waa furaha ilbaxnimada iyo aqoonta ee bulsho.
- Wuxuu sahlaa isfahanka bulshada iyo isu dulqaadashada iyadoo la kala fikir duwan yahay.
- Wuxuuna kobciyaa xirfadaha bulshada iyo dhaqaalohooda.
- Sidoo kale akhrisku waxa uu faa'iido balaadhan oo aan la soo koobi karin uleehay akhristaha wax yar hadaan ka xusnana waxaa ka mida:-
- Waxa uu kobciyaa garaadka maskaxeed iyo ka aqooneed ee qofka.
- Waa furaha xogaha iyo wadooyinka cusub ee lagaga gudbo daruufaha ku meersan nolosh.

- Wuxuu kula wadaagaa aqoon iyo khibrad dad hore oo aadan si kale ku hesheeen.

- Waxa uu kor uqaadaa kalsoonida, wuxuuna ku barayaa samaynta fikrado iyo qorsheyaal cusub.

Isku soo duuduuboo, akhrisku waa furaha aqoonta iyo ilbaxnimada. Waxa uuna saamayn ogan kuleehay nolosh shaqsiga iyo ta bulshadaba.

Qofka akhriska u waaya wakhtina waa sida qofkii uu Dr. Sajid lahaa 'waa qof wakhti u waayay cunada iyo cabitaanka oo kale!'

Hadaba hadii akhriska saa umihiimsanyahay, saamayn togan oo balaadhana kuleehay shaqsiga iyo bulshada inagu kaalintee ayaan kaga jiraa akhriska? Shaki male in aynu heerka ugu hooseeya kaga jiro.

Waxaan kusoo gunaanadayaa aan akhriska galino waqtiga aan galinay Qaadka, Qabiilka iyo Fadhi-kudirirka, si aan ugaadho hormar waara ummadaha qayrkeen ah na ula tartano.

KUN HABEEN IYO HABEEN

Waxa la soo wariyey Allah oge, waxa jiri jirey wakhtiyadii hore boqor boqor-radii reer banu saasan ka mid ahaa ee jasiiradaha hindiya iyo shiinaha ku yaaley , kuwaasi oo laha ciidan , caawiyal iyo shaaqale fara badan.

waxa uu laha laba wiil oo midna weyn yahey midna yar-yahey . waxey ahaayeen fardo fulayaal guuleysata tartamada Mar kasta, ka weyni waxa uu boqor ka ahaa magaalo. waxaanu ahaa mid caadalad Ku maamula bul-shadiisa, waxaanu ahaa mid ay jaceyl yihiin dadka magaladisa iyo boqortoyadiisuba , magaciisu waxa uu ahaa boqor Shariyaar, walaalkisa yarna waxa la odhan jirey boqor Shahsaman, kaasina waxa uu boqor u ahaa magalo Samraqanda la odhan jirey oo ay Ku noolayeyn dadka aan carabta aheen (Cajamta). Waxa ay xukumayeen boqortoyadiisa labada boqor maamulayeen muddo gaadheysa 20sanadod ayagu ku caan ahaa cadaalad ku dhaqida dad-kooda.

Sidoo kale waxa ay ahaayeen qaar aad u fur-furan Una laab xaadhan ,iyagoo xaalka ku ayaa boqor Shahriyaar u hilobey walaalkii boqor Shahsaman, waxaan uu amrey wasiirkiisi in uu u safro xagiisa una soo kaxeyo walaalkii , waxaan uu ugu jawaabey “waan Ku maqley waanan Ku adeecay”.

waxa uu bilaabey safar ilaa uu gadhey isaga oo nabada qaba, wasiirkii waxa uu u galey boqor shahsaman, waana uu salamey, waxaana uu u shegey fariintii u walalkii soo farey oo ahayd in uu soo booqdo, waxana uu ugu jawaabey “Waan aqbalay farintaa walaalkay”, waxaana u isku diyaariyey in uu u safro dhinaca walalkii. waxa uu soo diyaariyey qalabkii uu safarka ugu bixi laha oo ay ugu ho-reyaan fardihii, Baqalihii, Geeli lana socdan shaqaalihii iyo caawiyayaashi.

Waxa uu u dhaqaaqey dhinaca ay ka xigtey Magaladii uu walaalkii boqorka ka ahaa, markii uu waxooga Magaaladiisi ka soo maqna, ayaa waxa uu xasuustey shey uu Ku soo ilaabey qasrigiisi kaas oo ahaa hadiyad uu walaalkii kal hore u soo diray. Waxana uu bilaabey in uu dib u noqdo.- waxaana uu soo galey Qasrigiisi, waxa uu arkey Gabadhii-si oo la jifta adoon madow sariirtiisi. markii u arinka arkey aduunyadii ayaa ku madoobatey waxaan uu naftiisa Ku yidhi:”hadii arinkani dhacey aniga oo magaaladiba ka tagin, siduu noqon ariinka gabadhan khiyamada badani hadaan Ku maqnado walaalKey agtiisa muddo ...?”.



Intaa dabadee waxa uu la soo baxey seftiisi waxa uuna Ku dhuftey labadoodiba, Isla markii ba waxa u dib u bilaabay socdaalkii xagga walaalkii isaga oo Amar Ku bixiyey in la dhaqaajiyo, waa uu socdey ilaa u gaadhey Magaaladii uu Boqorka ka ahaa walaalkii. Markii u magaaladii u dhawaadey waxa uu direy gadhsi-yayal, gaadhsiinayey in uu soo socdo walalkii, waa uu soo baxay Boqor Shahriyar si uu u soo dhaweyo Boqor Shahsaman, waa u salaamey wana uu Ku farxey farxada xagii ugu dambeysaya, waa uu la fadhisteey isaga oo ula sheekeysanaya si fur-furni Ku jirto.

Arinkii oo sidaas ahaa ayaa Boqor Shahsaman xasuustey wixii ay sameysey Gabadhiisu, waxa ka muuqatey Mar kaliya murugo saa'ida, midab kiisi u is badaley, jidhkiisina oo daciifey, Mar kaliya ayuun buu Boqor Shahriyar arkey xalada uu Ku sugan ayaahay walalkii Shahsaman waxa uu u maleynayey in ay sabab u tahey magaladii iyo boqortoyadii uu ka yimid mana uu weydiin waxa Ku dhacey.

Maalmo Ka dib Ayaa uu Boqor Shahriyar Ku yidhi walalkii:"walaalkayo! waxaan arkey in uu jidhkagii daciifey midab kaagina is badaley ee maxa kugu dhacey?" walaalkiiba Ku yidhi:"walal waan niyada jabsanahey", laakinse ugama uu waramin wixii uu ku soo arkey xas-akiisa , walaalkiiba Ku yidhi:"waxaan doonayaa in aad ila aado ugaadhsi, waxa laga Yaabaa in aad soo yara nafiste", waa uu diidey Shahsaman in uu raco walaalkii waxaana uu safrey kaligii, qasriga Boqorku waxa uu laha shabag ka dul sareya beerta walaalkiina waxa uu eegayey beerta waaba albaabkii qasriga oo la furayo oo ay ka soo baxayaan labaatanan jariyadod iyo labatan adoon kuna dhex jirto Boqoradii, iyada oo lahayd qurux soo jidhasho .

waan diley labadoodiba, waxaan Ku imid aniga oo ay arintaasi ugu weyn tahey, taasina waa sababta keyntey in uu midab keygu is badalo jidhkeyguna daciifo, lakiin Iga cafi in aan ku sheego waxa midabkeygii soo celiyey"markii uu maqley Shahriyar hadalkii Shahsaman waxa uu Ku yidhi:"illaheyban kugu dharshe ii sheeg sababta kuu soo celisey midabkaga" waxaanu uga waramey wixii uu Ku dhex arkey qasriga intii u ka maqna, waxaana uu Shahriyar ku yidhi Shahsaman:" Waxaan doonaya in aan indhaheyya Ku arko".

Waxa ay u kaceen meel ay biyo ka soo shubmayan. Waxayne iska saaren dharkii kadibna wey wada fadhiisteen goobtii. inta ka dib waaba gabadhii boqorka oo leh:"Mascuud" waxaba u yimid adoon madow, waxeyna Isa saaren laabata kuwii kale hadhey na sidii si leg ayeey sameeyeen, ila ay maalintii daba jeedisey. Markii uu arkey Shahsaman waxa ka yaraadey wixii uu dareemayay ee hinaase iyo murugo ahaa waxaan uu yidhi:" balaayadii igu dhacdey tan Wey ka yareed, arinkanina waa u ka weyn yahay kii aniga igu dhacey" Kamanu suulin in uu wax cuno waxna cabo ilaa uu walalkii ka soo noqonayey .

Inta ka dib markii walalki soo noqdey ayeey Isa salaamen laabtana is galiyeyn, waxaanu uu Boqor Shahriyar la fadhisteey walaalki Boqor Shahsaman, waxa uu arkey isaga oo midab kiisi u soo noqdey wajigiisina casan noqdey, bilaabeyna in uu wax u cuno si niyadi Ku jirto ,waa uu la yaabey Shahriyar walalkii Shahsaman waxaana uu Ku yidhi:" Walaalkayo waxan arkayey wajigaga oo hurud ahaa , hadana waxaan arkaya in midabkaagi Ku soo noqdey xaalkaga iga waran " waxa uu yidhi:"isbadalkii hore ee Ku dhacey midab keyga waan kaga warami doona lakiinse iga cafi in aan kaga waramo waxa midab kaygii soo celiyey" waxaana uu yidhi:" Iga waran waxa badaley midab kaga ee Ku jilciyey" waxa uu ku yidhi:" Waaxad ogtahay anugu markii aad I soo dirtey wasiir kaga wuxuu iga dalbadey in aan imaado xagaga, waxaan bilaabey in aa diyaariyo raageeygii si aan Safar ugu soo baxo xagaaga ilaa aan magaaladi aan ka soo baxo, intaa dabadeed ayaan xasuustey hadyadii aad I siisey oo an qasriga kaga yimid, waan noqdey waxaan arkey gabadheydii oo la huruda adoon madow,

Waxa uu Shabsaman ku yidhi Walalkii shahriyar:"hadii sidaasi dooneyso waxa aad iska dhiga in aad u safreyso ugaadhsi, agteeydana ku dhuumo si aad u aragto arinka uguna xaqiiqsato indhahaga" Wuu dhawaaqey boqorkii iska xiligii, waxaanu uu Ku dhawaaqey in uu safri doono, waxa baxey ciidankii iyo fardihii ilaa ay gaadheyn duleedka magalada, boqorkii wuu baxey, intaa la dibna waxa uu fadhiistey cariish, cariishkas oo sarna faras dushi, waxa uu ku yidhi wiilaashisi u shaqeynayey:"cidna ayaaney soo galin" inta dabadeed uu is qariyey waanu baxey, isaga oo isku qarabaya qasriga uu joogey walaalkii, lagana arkaayey beerta, saacad wakhtiga ka mid ihi markii ay tagtey, waaba jaariyadihi , adoomihi iyo boqoradii oo galaya meshi biyuhu ka soo shub mayeen, sameynayan wixii uu u sheegey walalkii ilaa ay cad-ceedi ku dhawaaqey in ay dhacdo markii uu arinkaasi arkey boqor shahriyar waa uu u qadan waayey.

Inta ka dib waxa uu ku yidhi Shahriyar walaalkii Shabsaman:"in keyn aynu Safarne baahina uma qabno boqortooyo ilaa inta aynu soo arkeyno cid kale oo ay ku dhacdey tan inaga inagu dhacdey, hadeyn cidna ku dhicin arinkani miyaaney kula ahayn in ay geerideenu ka wanagsantahey nolasheena?"

LA SOCO QEYBAHA DAMBE

Waxa diyaariyey
Hayaan Editorial Team
Email: magazinehayaan@gmail.com
Tell: 063-4226594 / 065-9907747

TUSAALAYAASHA DADKA GUULAYSTAY



Bismillah wal-xamdulilaah wasallaalahu wasalam calaa rasuulilaah marka hore waxaan mahad u celinayaa allaah cwj ee ii suurto geliyey inaan maqaalkan qoro ku saababsan hanka ayo hammi-ga sare ee qof leeyahey, sida qofku ugu baahan yahay cunto iyo biyo ayuu ugu baahan yahay inuu lahaado hansare laakiin haadanay qofka u ca-laamadaysnayn meel uu hiigsanayo oo uu doonayo inuu gaadho waxaynu odhan karnaa waa qof iska nool oo mawjadaha aduunyadu kolba dhinac u wadaan. waxa jiri jiray asxaabi la odhan jiray cumar binu cabdicasiis wuxu yidhi {waan hamooday oo waxan ku hamooday inaan luuqada carabiga barto wuu bartay, hadana wuu hamooday wuxuu ku hamoday inuu guursado inanta boqorka wuu guursaday, hadana wuu hamooday oo wuxu ku hamoday inuu noqdo badhsaabka madiina wuu noqday, kadib markuu bartaa marayo ayuu yidhi hadaan mar noqday badhasaabkii xaruntii mislimiinta maxaa ii diidaya inaan noqdo madaxweynaha muslimiinta wuu noqday.} waxaasa hammi la dhahaa hadaba max-aynu ka faaidaynaa

1. Alle talo saarasho iyo adeecida awaamirtiisa
2. Sabar
3. Hiigsi dhow iyo mid fog
4. Dadaal
5. Nasiib
6. Niyad wanaag

Waxa jira caqabado badan oo kaa hor iman kara ha noqdaan qaar qoyseed, qaar deegaan ama qaar adi laftaada kaa yimaada, lakin yaanay noqon qaar kaa horistaaga gaadhida hadafkaaga tusaale: -rasuulku SCW waynu ogayn wixii dhab kasoo gaadhay faafinta diinta ee kaga imanaysay gaaladii hadana hadafkiisu wuxuu ahaa gaadhsiinta diinta cadceed kasoo bax iyo cadceed ka dhac waanu ku guuleystay.

Tusaale 2aad: -ninkii EdISON la odhan jiray ee soo saaray laambada wuxuu isku dayay 99 jeer lakin markii 100 aadayuu isku dayay oo uu ku guuleystay. xikmad carbeed baa tidhaahda "himatul baciid wamawtu qariib". haddii aad doonaysid inaad mustaqbalkaaga ku guuleysatid u samee hiigsi fog ka dibna la kaalay hammi xoogan.

Hammiga iyo hanka fogi waa waxa laba qof is dhaafiya tusaale: -qof baa wuxuu tukadaa 5 salaadod wuuna sooma 30 ramadan, mid kalana wuu tukada 5 salado lakin wuxu la yimada sunayal wuu sooma 30 ramadan lakin wuxu la yimada soom sunayal ah labada qofi midina faralkii ayuu iska riday midna intuu riday ayuu weliba sunayal raaciyey isku hiigsi maaha labada qofi.

Ha noqon mid ka niyad jaba gaadhida hadafkiisa, haku fikirin wax yaabaha hooseeya ku hammi meel sare maah-maah carbeed baa tidhaahda "yaanay kusoo celin wax aan xidigaha ahayn", hala saaxiibin kuwa hanka yar la saaxib kuwa hanka weyn sababto ah sida la isku qaadsiiyo durayga ayaa la isku qaadsiiya han yarida tusaale: -laba arday oo isku galaas ah ayuu imtixanki usoo galay midi wuxu ku haminaya keliya inuu imtixaanka baaso midna inuu kaalinta u horeysa galo waa laba arday oo isku mid ah lakin kala han sareeya. hadah rabto inaad guuleysati iska ilaali MALAHA waayo waa caqabada ugu weyn ee horistaagta gaadhida hadafka, ha odhan malaha waan samayn karaa dheh waan samayn karaa.

Hadii aad guuldaraysatid haku joiin halkaa lakin kasii wad ninkii la odhan jirey ABRAHAM LINCHOLA madaxweynihi 16aad ee soo mara mareykanka 28 jeer ayuu guuldareystay oo iskugu jiret taran deegan, barlaman lakin markii 29 jeer ayuu guuleystay. waxan kuso khatimaya tix ka mid ah gabey uu tiriyey odaygii TIMACADDE oo aheyd "haddii aanad hammoon waa mooyi dabadeede"

Waxa Qorey:

Khadar Ismaaciil Haybe

ALLE KA CABSIGA



Alle ka cabsigu waa waxa kaliya ee laga rabo in uu samayo qofka doonaya in uu helo badhadhaha aduunyada iyo tan aakhiraba. Alla ka cabsigu waa dariiqa nolasha dhabta ah.

Qofka dhuuxa una fiirsada quraanka kariimka ah waxa uu arki doona inta khayr lagu xidhay inta uu le'eg yahay, waxa kale oo aad ku heli doontaa abaalmarin, farxad iyo badhaadhe aan dhmmaad lahayn .

Maqaalka waxa aynu ku qaadan doonaa waxa uu yahay alle kacabsigu, midhaha laga faaiido, iyo sida loo gaadho macaanka alle kacabsigu leeyahay. Aynu ku bilawno qeexida kalmada all aka cabsi:

☒ Alle kacabsigu waa shayga qofka muslimka ahi kaga badbaadayo cadhada iyo ciqaabta alle, Una noqda dayr uu kaga gaashaanto, dayrkaasi oo ah inuu la yimaado wixii alle faray

Kana dheeraado wuxuu u diiday.

☒ Cumar bin khaddaab ayaa waxa uu weydiiyay Ubayah bin kacab; “waa maxay alle kacabsigu”

Markaas ayaa uu ugu jawaabay ; “miyaad martay meel ay ka buuxdo qodoxi” markaasuu ugu jawaabay: “haa” da-beedna ubayah ayaa hadalkii sii raaciyay , “oo dabeeto maxaad samaysay”

“waxaan kor u qaaday maryihii aan xidhna ka dibna , waa ka talaabsaday oo marba lug Ayaan u qaaday anigoo kacabsanaya inay I mudo” ubayah waxaa uu ugu jawaabay “alle ka cabsigu waa kaas”

☒ Alle kacabsigu waxa uu kuu horseed-ayaa inaad u tafaxaydato daacada alle , oo aad fiiriso Xalaasha iyo xaaraanta.

☒ Alle kacabsigu waa wadada uu ku gaadho qofku yaqiinta. sidoo kale, waa sahayda qalbiga iyo ruuxda , oo alle kacabsiga ayay quutaan oo ku xoogaystaan kuna tiirsan yihiin si ay u helaan badbaado.

INU AI-QAYIM markuu qeexayay alle kacabsiga waxa uu yidhi macnaha dhabta ah ee alle kacabsigu

Waa “inaad adeecdo alle, adigoo rumaysan alle iyo abaalmarintiisa , kana rajaynaya inuu kaa abaal mariyo adeecidiisa aad adeecday, ha ahaado wax lagu amray iyo wax lagu diiday labadaba.

Sidoo kale adoo ka tagaya waxa uu alle kaa reebay adoo rumaysan allaha kuu diiday iyo inay jirto sabab laguugu diidaya oo aanada ogaan Karin.

Alle kacabsigu waxa uu u qaybsamaa 3, balse waxaynu sheegaynaa 2 kaliya.

1; Inaad iska ilaaliso danbiga naarta kugu waarinaya kaas oo ah gaalnimada.

Waxaanad iskaga ilaalinaysaa inaad ku dheganaato kalmada tawxiidka.

2; Inaad iska ilaaliso wixii sabab u noqon kara inaad cadaabka dhadhamiso in yarna ha ahaatee. Kuwaas oo noqon kara dambiyada waaweyn iyo kuwa yaryarba.

Si kale hadaynu u qeexno alle kacabsigu waa :

1; iska ilaalinta gaalnimada ,
2;bidcada.

3;danbiyada nooc walba ha ahaatee.

Sidoo kale waxa muhiim ah inaad ogaato , Sidee isku ilaalinayaa?

Waxaad u baahan tahay inaad barato oo aad ogaato axkaamta diinta islaamka iyo maxaa xalaal iyo xaaraan ah.

XAQIRISTA DUNUUBTA

dadka qaar ayaa yaraysta dunuubta oo wax fudud u haysta . Rasuulku waxa uu yidhi {SCW} iska ilaaliya inaad yaraysataan oo xaqirtaan dunuubta waxaanu ku metelay qof safar galay oo soo urur saday xaabo isuna geeyay, taas oo dab bixisay markii danbe. Sidaa darteed dunuubtu haday isku biir biirto waxay keeni kartaa inay dab ku geliso.

Sharafta all aka cabsiga ka dhalata waa ay badan tahay oo ay ugu horreeyso inay ahayd darda-rankii uu alle kula dardaarmay dadkii inaga horreeyay iyo inaga :

[ولقد وصينا الذين أوتوا الكتاب من قبلكم وإياكم أن اتقوا الله] NISAA :131 .

Dadka ehlu cilmiga ahi waxay yidhaahdeen aayadaas ayuu quraanku ku wareegaa mana jiro khayr dhow, fog, muuqda ama qarsoon ilaa alle kacabsigu uu yahay dariiqa lagu gaadho .

Mana jiro shar noocuu doono ha ahaadee ilaa alle kaabsigu yahay xisin xidh iyo gidaar adag oo kaa badbaadiya dhibtiisa.

IBnu Taymiyah markuu ka hadlayay xadiiska **اتق الله حيث ما كنت** waxa uu yidhi ma garanayo dardaaran uga fiican dardaarankaa rasuulka alle cidii dhuuxda ee raacda

Xadiiskaasi waa dardaaran uu nabigu kula dardaarmay MUCAAD BIN JABAL oo rasuulku ku yidhi mar hore oo uu la talinayay ugu bilaabay :

(يا معاذ والله إني لأحبك).

waxaynu ka dheregsan nahay in qofku uu ku dadaalo la talinta iyo toosinta

Cida uu jecel yahay . Balka waran rasuulka alle oo ku dhaartay inuu jecel yahay MUCAD BIN JABAL , talooyinka uu siin doonaa maxay noqon doontaa ?

Maqaalkan oo dhamaystiran waxaad kaga bogan doonta cadadada danbe isagoo ka bilaabmi doona xadiska kor ku xusan .

Laakinse aynu wax ka ogaano waxyaabaha kale ee ay kalmadani koobsatay alle kacabsiga waa miisaanka aya dadku ku kala sarreeyaan alle agtii. Rasuulka ayaa la waydiiyey dadka yaa ugu karaamo badan wuxuu tidhi kooda ugu alle kacabsiga badan.

Midhaha ay leedahay alle kacabsigu waxa aynu ka soo qaadan karnaa sheekadan kooban

, Ali bin abi daalib ayaa waxa uu soo dhex maray quburo markaas ayaa uu yidhi xaalkiina ka warama ?

Anagu waxaanu war idiin haynaa in xoolihiini la qaybsaday, dumarkiina la guursaday, guryihiini in la degey. Intaa ka dib waa uu ilmeeyay waxaana uu yidhi ‘ alle Ayaan ku dhaartee haday jawaabi kari lahaayeen, waxay odhan lahaayeen waxaanu ogaanay in sahay aakhiro loo qaato ay ugu fiican tahay alle kacabsigu.

Sifooyinka ay leeyihiin dadka alle kacabsada waxa ka mid ah inay rumaysan yihiin, waxa maqan sida janada ,naarta iwm. Rumayn aan shaki lahayn oo lamid ah sida ay u rumaysan yihiin waxay arkayaan.

Faaidooyinka alle kacabsiga waxa kamid ah inay tahay wadada lagaga baxo culays kasta sidoo kale inay tahay sabab uu adoonku risiq ka helo meel aanuu ka filanayn.

Sida loo gaadho alle kacabsiga waxa kamid ah; 1; inaad ogaato inuu alle ku arkayo mar walba . 2; inaad xasuusnaato mar walba oo aad ogaatana cidhib xumada ay leedahay macaasida .

Waxaynu ku soo khatimaynaa qaybtan xadiis: nin ayaa u yimi nabiga markaas ayaa uu ku yidhi nabiga ila dardaaran waxaanu nabigu kula taliyay {ku dadaal alle kacabsiga waaayo waa halka uu ku koobsamay khayr oo dhami}.

MAQAALKAN WAXA QORAY OO AANU KA SOO TURJUNAY:

محمد صالح المنجد الشيخ


WIXII TALO IYO TUSALE AHA WAXAD KUS OO HAGAJIN DOONTA :

EMAIL: MUSTAFEINDHO@LIVE.COM

TEL: 00252634226594.

NORADIN

SECONDARY SCHOOL



KNOWLEDGE IS POWER